

Faayruska Furuqdaanyeerka

(Mpox Virus)



Faayruska furuqdaanyeerku waa xanuun naadir iyo halis ah oo waxaa keena faayrus ka yimid daanyeer. Faayruska furuqdaanyeerka waxa uu bah ahaan ka soo jeedaa faayruska furuqa. Calaamadaha furuqdaanyeerka waxay la mid yihiin calaamadaha furuqa, balse xoogaa ayey ka khafiifsan yihiin. Sidoo kale faafid ahaan waa uu ka yar yahay furuqa, oo waxaa dhif ah in loo dhinto. Faayruska furuq-daanyeerku waxa uu ku sii faafi karaa dadweynaha, xoolaha, iyo meelaha uu faayrusku gaaro. Faayruska furuqdaanyeerka waxaa lagu gartaa finan iyo nabarro jirka ka soo baxa.

Maxaa sabab u ah?

- ▶ Furuqdaanyeerka waxa keena waa faayruska furuqdaanyeerka. Ma aha wax si fudud la isugu gudbin karo qof ilaa qof. Waa in xiriir dhow lala yeesho qof qaba xanuunka si loo kala qaado faayruskan.
- ▶ Dadka qaarkood ayuu ku dhici karaa furuqdaanyeerka:
 - ▶ Marka si toos ah loo taabto nabarrada maqaarka ama qolofa qofka xanuunka qaba.
 - ▶ Marka qof xanuunka qaba lala wadaago gogol ama dhar.
 - ▶ Marka muddo dheer uu ku soo gaaro dheecaanka iyo neefta qofka xanuunka qaba.
- ▶ Furuqdaanyeerku waxa kale oo uu dadka ka sii qaadi kara xayawaanka dadka qaniina, kuwa xagta, iyo marka hilib loo diyaarinayo, ama isticmaalidda alaabada xayawaanka buka.

Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha xanuunkan?

- ▶ Furuqdaanyeerka waxaa caadi ahaan lagu gartaa finan cusub, oo aan la garaneyn oo noqda nabarro adag, wareegsan, oo ay dareere ama malax uga buuxdo gudaha ama afka. Calaamadaha kale waxaa ka mid noqon kara:
 - ▶ Qandho
 - ▶ Nudeennada difaaca oo bararsan
 - ▶ Muqro-xanuun
 - ▶ Madax-xanuun
- ▶ Finanka furuqdaanyeerka wuxuu caadi ahaan ku soo baxa hal ilaa saddex maalmood qandho ka dib. Dadka qaar ayaa laga yaabaa in ay marka hore isku arkaan finan ama nabar, balse waxa ugu xiga calaamado kale, ama waxay sii yeeshaan finan keliya.

Waa maxay fursadaha daaweynta?

- ▶ Inta badan dadka qaba furuqdaanyeerka uma baahna daaweyn oo waxay uga bogsadaan laba ilaa afar toddobaad gudahood. Hase ahaatee, waxaa la isticmaali karaa daawooyinka antifaayrus oo lagu daaweeyo furuqdaanyeerka.
- ▶ Dadka furuqdaanyeerka ka soo qaada qof kale oo qaba waxa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan in la tallaalo si looga hortago in uusan xanuunku faafin iyo si loo yareeyo dhibaataada calaamadahiisa.

Sidee baa looga hortagi karaa?

- ▶ Haddii uu qof lammaane ah qabo furuqdaanyeerka, waa in aysan labada qof isu galmoon oo waa inay kala fogaadaan ilaa uu qofka xanuunsan si fiican u bogsodo.
- ▶ Haddii lagu qaadsiiyo furuqdaanyeer, la soco calaamadaha ilaa 21 maalmood ka dib taariikhdiisii lagu qaasiyey.
- ▶ Ha taaban oo ka fogow gogosha, shukumaanka, ama dharka qofka qaba furuqdaanyeerka.
- ▶ Haddii aad calaamado isku aragto, si degdeg ah ula xiriir dhakhtar oo dadka ka fogow.

BUREAU OF COMMUNICABLE DISEASES

<https://www.dhs.wisconsin.gov/dph/bcd.htm> | DHSDPHBCD@dhs.wi.gov

Wisconsin Department of Health Services | Division of Public Health

